

Darajiyo Xil Yaa Mudan?



Cabdi Yuusuf Xasan “Cabdi-Dhuux”

Tixdan

Tixdan waxaa curiyay Cabdi Yuusuf Xasan, oo ku magac dheer “Cabdi-Dhuux”, Sannadkii 1997.

Tixdan waxay tilmaamaysaa hoggaanka ku habboon ummad ka soo kabanaysa colaado sokeeye; ha noqoto sifooyinka qofka hoggaamiyaha noqonaya looga baahan yahay ama waajibaadka iyo hawlaho hor yaal.

Abwaanku si farshaxannimo leh ayuu u taxay hawlaho hor yaalla cidda rabta inay daadihiso dabaadiga ka soo haray colaado sokeeye, oo ‘dulli iyo dhib’ ka saari kara. Sidaas darteedna, mudan darajo iyo xil.

Tixdani waa 60 meeris.oo jiifto ah, waxay ahayd hees ka mid riwaaad la oran jiray “darajiyo xil yaa mudan” oo Muqdisho lagu dhigay. Heestani waxay caan baxday sannadkii 2000, xilligii uu socday ‘Shirwaynaha Nabadaynta Soomaaliya’, magaalada Carta, Jabuuti.

1. Dal burburay dadkiisii
2. Debaadigii ka soo haray
3. Dulli iyo dhib kama baxo
4. Illaa dawlad caadila
5. Iyo qaran dib loo helo.
6. Doodi waxay ka joogtaa
7. Dadweynuhu isweydiin
8. Darajiyo xil yaa mudan?
9. Bulsho daadahayn kara?
10. Dadka Soomaaliyeedow
11. Farriimaha durdura iyo
12. Su'aalaha is daba yaal
13. Dulucdiyo ujeeddada
14. Waa dood innoo furan!
15. Yaa colaadda damin kara?
16. Dabka yaa bakhtiin kara?
17. Yaa dooni kara nabad?
18. Dalka dibudhiskiisiyo
19. Dadka yaa wax tari kara?
20. Yaa qaranki shalay dumay
21. Darbiga u adkayn kara?
22. Ummadda yaysku duwi kara
23. Kala durugtay waayadan?
24. Dariiqyada agoontaa
25. Gaajadu ku dubatiyo
26. Curyaamiinta daawiyo
27. Yaa daryeel u fidin kara?
28. Waa dacar qabiilkuye
29. Yaa "diiday" oran kara?
30. Dadka yaa hor iman kara?
31. Hadal deeqa oran kara?

32. Kasban kara rag iyo dumar?
33. Oo xumo ka daahira?
34. Cadceed baa dul joogtoo
35. Dhidid baa ka da'ayoo
36. Diif baa ku raagtoo
37. Bulsho daalan weeyee
38. Durdurrada xareediyo
39. Yaa damalka gayn kara?
40. Dareenkii waddanigiyo
41. Yaan ka dhiman damiirkoo
42. Dhibaatadu damqaysaa?
43. Kuwaa daydaygaa iyo
44. Qaaddicu dariiqyada
45. Duruuus yaa u dhigi kara?
46. Dawga toosan marin kara?
47. Hubka daadsha oran kara?
48. Dawladaha jaarkiyo
49. Lays kama durduriyee
50. Sumcad dunida yaa ku leh?
51. Dhan yaa ku leh dulqaad badan
52. Dhanna ku leh dadaal wacan
53. Dhanna daacadnimo sugar
54. Oo na daadahayn kara?
55. Waxaa duubka xiran kara
56. Oo doonta wada kari
57. Nin la doortay oo mudan!
58. Annaguna darajadaasaan
59. Duco iyo kalsooniba
60. Ugu sii daraynaa!!

— O —

About This Journal

Somali Studies: A peer-reviewed academic journal for Somali studies is a broad scope multidisciplinary academic journal devoted to Somali studies; published annually by the Institute for Somali Studies in print and online forms. **Somali Studies** aims to promote a scholarly understanding of Somalia, the Horn of Africa and the Somali diaspora communities around the globe.

Somali Studies provides a forum for publication of academic articles in broad scope of areas and disciplines in Somali studies, particularly focused on the humanities and social science. **Somali Studies** appreciates papers exploring the historical background or navigating the contemporary issues; special consideration will be given to issues which are critical to the recovery and rebuilding of Somalia, a country emerging from a devastating civil war.

Institute for Somali Studies (ISOS) is a research centre within Mogadishu University. The Institute aims at knowledge generation through research and analysis on Somalia, Horn of Africa, and the Somali communities in abroad. The institute conducts and coordinates researches, workshops, conferences, discussions and dialogues; and disseminates findings, reports, and analysis through publications and events.

Somali Studies is open access journal and all articles are freely available to read, print and download from the website of the Institute.

Disclaimer: All views and opinions expressed in the article(s) published in **Somali Studies** journal are the sole responsibility of author(s) of the article(s). It does not necessarily reflect those of the editors, the Journal, nor the Institute for Somali Studies.

Copyright© 2017 by Institute for Somali Studies
All rights reserved

Published by Institute for Somali Studies

Website: www.isos.so - Email: isos@mu.edu.so
Tel/Fax: +252 1 858118
Mogadishu, Somalia

Printed in Somalia